



Ka Saaritanada Guryaha Dowlada


Public Housing Evictions

Warqadan war gelinta ah waxaa loogu tala galay dadka **degan guryaha dowlada** ee hela Ogaysiiska Guraha Looga Saarayo (Lease Termination Notice). “Guryada Dowlada” (“Public housing”) waxaa laga wadaa guryaha kirada ah ee ay maamusho ama ay leedahay hay’ada la yiraa (Public Housing Authority.) Ee ama guryaha gaarka loo leeyahay ama kuwo lagu dego waxa la yiraa (Section 8) ka.

Ka saarida dadka laga saarayo guryaha dowladu waxa ay raacaan nidaamka maxkamadaha Gobolka ee guryaha la isaga saaro LAAKIIN sidoo kale waxa ay leeyihiin talaabooyin iyaga u gaar ah. Akhri Warqadan war-gelinta ah **iyo** warqadayada Wargelinta ah ee [Evictions](#).

Qaar ka mid ah waxyaabaha ku qoran warqadan waxaa dhici karta in aysan adiga ku quseeyn hadii aad ku nooshahay guri dowladeed oo ay leedahaay hay’ada la yiraa [Minneapolis Public Housing Authority (MPHA).] Sababtuna waxaa weeye hay’ada la yiraa MPHA waa hay’ad Dadka Shaqo la Doonta (MTW) oo maamulkeedu yahay si ka duwan sida loo maamulo guryaha dowlada ee Minnesota. Hadii aad ku nooshahay guryaha hay’ada MPHA oo aad qabto su’aalo ku saabsan arrintan, fadlan wac Xafiiska Gargaarada Sharciyada ee Minneapolis (legal aid) (612) 334-5970.

Hadii aad hesho Ogaysiiska Guriga Lagaaga Saarayo, Waxaa wanaagsan in aad wacdo Xafiiska Gargaarada Sharcigayada (legal aid) ee magaalada si laguu caawiyo



Jabinta Heshiiska Guriga lagu degan yahay

Hay’ada Guryaha (Housing Authority) ayaa waxa ay kuu soo diri ogaysiis qoran oo guriga lagaaga saari oo kuu sheegaya qaybaha heshiiska guriga ee ay aaminsan yihiin in aad jabisay. Ogaysiiskani wuxuu kaloo kuu sheegi maalinta ay tahay in aad guriga ka baxdo.

Hadii aadan sameyn waxa hay’ada Guryahu ay ku leedahay waad sameysay ama aadan u malaynayn waxa ay sheegayaan inay yihiin wax weyn oo cid guri looga saari karo, racfaan ayaan ka qaadan kartaa guri ka saarida ay damacsan yihiin.

Waa khasab in aad hay’ada Guryaha (Housing Authority) u diro qoraal aad ku codsanayso racfaan.

Waxaa jira labo marxaladood oo la maro kolka racfaanka la qaadanyo. Marxalada hore waa Kulan yar. Hadii dhibka kulankaa lagu xalin waayo, Waxa aad codsan kartaa Dacwo Weyn oo la Dhageysto.

Qaar ka mid ah Guryaha Dowladu (Housing Authorities) racfaan ma ogola mar marka qaarkood. Ka eeg qaybta hoose ee la yiraa (“Safety Risk and Criminal Activity”) akhbaar dheeraad oo arrintan ah.

Kulanka Yar:

- Wuxuu qof ku caawiya ama qareen si ay kaaga caawiyaan inaad si fiican u mudacdo. Hadii aad u baahan tahay turjubaan in laguu keeno xilliga kulanka, u sheeg Ha'ada Guryaha. Hay'ada Guryaha iyadaa laga rabaa in ay bixiso lacagta turjubaanka.
- Hadii aadan jabin heshiiska, isku day in aad cadeymo keento kulanka. Cadeymahu waxa ay noqon karaan, dukumiintiyo, oraahyo qoran oo aad ka keento makhraatiyaal kuwaa oo ku gargaari kara adiga.
- Hadii heshiiska guriga aad jabisay, isku day inaad soo bandhigto qorshe cad oo aad uga hortagayo in aan dhibkan oo kale uusan dhicin mar dambe. Heshiisku wuxuu noqon karaa inaadan u ogolaan doonin in qof dhib wada ahi uu mar dambe kuu yimaado ama qorshe ah inaad kaalmo u hesho dhibka keenay jabin heshiiska.

Hadii jabinta heshiiska ay tahay midku saabsan dagaalka qoyska dhexdiisa ama fara xumayn. Eeg war gelinta

[Subsidized Housing Rights for Victims of Domestic Violence and Sexual Assault.](#)



Hadii jabinta heshiiska gurigu ay tahay mid ku saabsan naafanimo, eeg warqada war-gelinta ee [Reasonable Accommodations: Do You Need Your Landlord to Make a Change Because of Your Disability?](#)

- Hadii aad jabisay heshiiska iyo hadii kalenba, ka taxa dar waxa aad leedahay kolka kulanka yar la isugu yimaado. Wax kasta oo aad tiraahdo adiga ayey baxar kugu gelin karaan ha dhow.
- Hadii aad is tiraawaa lagaa gar leeyahay, waxa aad oran kartaa guriga waa ka bixi, laakiin codso in lagu siiyo waqtiga aad u baahan tahay in aad ku guurto iyo in ay war-bixin fiican kaa bixiyaan qolada guryahu (Housing Authority.) Go'aankani waa mid aad u culus. Aad uga tasho ka hor inta aadan ogolaan inaad guurto. Kolka hadaad heshiis gaartaan waa inaad heshiis ka soo baxdo!
- Waydii hay'ada (Housing Authority) inay wixii heshiis ah oo aad wada gaartaan uu qoraal noqdo. Hadii heshiiska UUSAN ku jirin wax kasta oo aad ku heshiiseen, hay'ada guryaha (Housing Authority) warqada u qor kana codso inay wixii maqan saxaan. **Ha ka ogolaan wax aadan doonayn inaad sameyso ama aadan sameyn karin.**

Hadii aydaan xal ku gaarin kulanka yar, codso Dhagaysiga Dacwo weyn.

Dacwada Weyn:

- Dacwada Weyn waa Maxkamad oo kale. Waa khasab inaad u diyaar garowdo dacwada.
- Waad soo kaxaysan kartaa qareen ama qof kale oo ku gargaara.
- Dacwadaada waxaa dhici karta inuu qaado hal qof ama ay qaadaan dhowr qofi. Dadka qaadaya dacwadaada waxa dhici karta in ay iyana yihiin dad degan guryaha dowlada ama ka shaqeeya.
- Wuxuu qof ku caawiya ama qareen si ay kaaga caawiyaan inaad si fiican u mudacdo. Hadii aad u baahan tahay turjubaan in laguu keeno xilliga kulanka, u sheeg Ha'ada Guryaha. Hay'ada Guryaha iyadaa laga rabaa in ay bixiso lacagta turjubaanka.

- Dacwada, adiga Qolada Guryaha mid mar ayaa gaar loo wareysan. Wuxaad xaq u leedahay in si fiican laguula dhaqmo xilliga dacwada. Adiguna waa in aad si fiican ula dhaqantaa dadka kale.
- La imow wixii cadeyn ah ee aad haysato ee la xiriira inaadan jabin heshiiska. La imow cadeyn ah in waxa lagugu haystaa ay khalad yihiin. La imow cadaymo sharxi sida asyan u sugnayn warka Qolada Guryuhu. La imow makhraatiyaal kaa caawinaya inaad cadeyso inaad qof fiican tahay. La imow koobiyada cadaymahaaga si aad u tusto cid walba. Adiguna koobigaaga meel dhigo.

Ogow: Qaar ka mid Guryaha Dowladu waxa ay leeyihii sharciyo ku saabsan kolka la rabo inaad ogaysiiso wixii cadeymo ama makhraatiyaal ah ee aad haysato- ama marka ay tahay inay adiga kuu sheegayaan. Waydii qolyaha Guryaha (Housing Authority) sharciyada maxkamada ee u degsan hadii aadan helin wax akhbaar ah. Hadii aad hesho akhbaarta akhri una raac sharciyada si taxa dar leh.

- Hadii liiska aad u jabisay dagaal qoyska dhexdiisa ah ama fara xumeyn awgeed eeg warqada wargelinta ee [Subsidized Housing Rights for Victims of Domestic Violence and Sexual Assault](#).

Hadii jabinta liiskaagu ay tahay mid la xiriirta naafanimo, eeg warqada wargeinta [Reasonable Accommodations: Do You Need Your Landlord to Make a Change Because of Your Disability?](#)

- Hadii ay jiraan dad odayaal beebleed ah ama aad daris tiiuin oo la xaq dhowro oo ku gargaari kara, wadiiso inay kuu raacaan dacwada maalinta la dhageysanayo si ay kuugu hadlaan.
- Wuxaad heli go'aan qoran oo laga soo saaro Dacwada Weyn dhageysigeeda. Go'aankaasi waxa uu kuu sheegi inaad guuleysatay in lagaa adkaaday. Go'aankaasi waa in uu ku salaysnaado cadeymaha maxkamada waxa uuna kuu sheegi sababaha go'aanka loo gaaray.



Maxaa Dhici hadii la iiga adkaado Dacwada Weyn?

Hadii lagaa guuleysto Dacwada weyn, Hay'ada Guryahu waxa ay kuu soo diri ogaysiis wata maalinta ugu dambeysa ee ay tahay inaad guriga ka baxdo. Hadii aadan guriga ka bixin maalintaa, Hay'ada Guryahu waxa ay ka xareysan kartaa Dacwo guriga lagaaga saarayo Maxkamada Gobolka.

Waad ka codsan kartaa Maxkamada guri ka saaridu in ay mar kale dacwadaada qaado. Markiiba wac xafiiska gargaarka sharciyada si laguu caawiyo. Wuxaad sidoo kale waydiisan kartaa Hay'ada Guryaha waqtii dheeraad ah oo aad guriga uga baxdo inay ku siiso, aysanna ceeb kaa sheegin, hadii ay rabaan inaad guriga uga baxdo adoon dacweyn.

Wixii heshiis ah oo aad la gasho Hay'ada Guryaha iyadoo qoraal ah waa inaad heshaa. Kolkii aad heshiis wada gaartaan, waa khasab inaad heshiiskaa ka soo baxdo.

Taakuleynta suurta galka ah in la heli karo

Hadii hay'ada Guryahu ay guriga kaa saarayso sababtoo ah wax liiska ku qoran ama xeerar kale oo aad adiga ama xubin qoyskaaga ka mid ahi raaci wayday iyadoo sababtu tahay naafanimo agweed, Wuxaan codsan kartaa in taakuleyn aad hesho si aad guriga ugu sii jirto.

Eeg warqada war-galinta ee [Reasonable Accommodations: Do You Need Your Landlord to Make a Change Because of Your Disability?](#)

Khatarta Amaanka iyo Arrimaha Dambiyada ah

Hadii adiga, qof qoyskaaga ka mid ah ama qof marti kuu ahi aad isticmaashaan doroogo, ama aad gaysataan dambiyo kale ama aad khatar ku tiihiin amaanka dadka kale ee kireystayaasha ama shaqaalah, Hay'ada Guryaha khasab kuma ah inay qabato Kulanka yar ama Dacwada Weyn midna. Ogaysiiska guriga lagaaga saarayo ayaa kuu sheegaya in habraacaan la baajiyey. Hadii la baajiyoo taa, gurigana aadan ka bixin Hay'ada Guryahu maxkamad ay ka xareyn dacwo guriga lagaaga saarayo.

- Hadii guriga lagaaga saarayo doroogo isticmaalid ama dambi kale, wax oraaha oo arrinta ku saabsan cidda ha ku oran. Ha ogolaan wax doroogo isticmaalid ama fal dami ah hadii aad heshiis la galaysid Hay'ada Guryaha. Hadii guriga lagaaga saaro doroogo isticmaalid ama fal dambi ah, guri dowladeed ama mid kiradiisu jaban tahay laguma siin doono mudo 3 sanno ah.
- Guri ka saaridu kaliya kuma salaysnaan karo xirid lagu xiray uun. Hay'ada guryahu waa in ay baarto ayna cadeyso iney u badan tahay inaad wax sharci darro ah aad sameysay oo kalifay xariga lagu xiray. Hadii ay Hay'ada Guryahu ay cadeyn karto taa, kolkaa guriga waa lagaa saari karaa xataa hadii aan wax dacwo ah lagugu soo oogin ama maxkamadi aysan dambi kugu helin.
- Hadii aad qabto in Hay'ada Guryahu ay khaldan tahay, waa in aad sharaxdaa sababta. La imow cadeyn sheegaysa inay khaldan yihiin.
- Hadii aad is leedahay hadii maxkamad la aado waa lagaa gar heli, mar marka qaarkood waxaad kula heshiin kartaa inay ku siiyaan waqtii aad guriga uga baxdo. Hadii aad heshiis la gasho hay'ada waa KHASAB inaad adeecdo – sidaa awgeed hubi inaad adeeci karto heshiiskaa.



Xeerarka Hadii aad tahay Qof dhib ku Soo Gaaray Dagaal Qoyska Dhediisa ka dhacay

Hay'ada Guryahu guriga kaama saari karo hadii dhibka dhacay uu u dhacay arrimo la xiriira dagaal qoyska dhediisa ah, gaatan, shukaansiga gacan qaadka leh ama fara xumeynta adiga ama xubin qoyskaaga ah loo geysto. Guriga lagaagama saari askar wacasho. Minnesota, dambiyada gacan qaadka waxaa ku jira ugu hanjabid gacan qaad ilmaha, qaraabada iyo xubnaha kale ee qoyska.

U sheeg Hay'ada Guryaha hadii aad aaminsan tahay in dhibka jabinta liisku ay la xiriirto sababaha. Eeg warqada war-gelinta, [Subsidized Housing Rights for Victims of Domestic Violence and Sexual Assault](#).

Hay'ada Guryahu waxa ay ku waydiisan kartaa inaad tusto cadeymo muujinaya inay jireen dhacdooyin ah gacan qaad ama fara xumeyn oo dhacay 14 cisho gudahood. Waana inay kugu waydiistaan qoraal ahaan. Marmarka qaarkood qaadashada amar maxkamadeed oo aamaan helid ahi waa jid fiican oo lagu cadeyn karo gacan qaad qoyska ah inuu dhacay. Hase yeeshay, Hay'ada Guryahu Kuguma **khabsi** karo inaad amar maxkamadeed soo hesho. Waxaa jira siyaabo kale oo loo cadeyn karo. Gargaar ka hel xafiiska Gargaarada sharciyada ama dadka u gargaara dhibanayaasha gacan qaadka ama fara-xumeynta loo geysto hadii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo dacwada.

Bixin La'aanta Kirada Guriga

Hadii kiradaada aadan bixin waqtigii loogu tala galay, Hay'ada Guryahu waxay kuu soo diri ogaysiis oranaya waa inaad kirada bixisa 14 cisho gudahood ama waa inaad guriga ka baxdaa.

- Hadii aadan lacag haysan, wac markiiba Hay'ada Guryaha si aad u eegto inay ogol yihiin inaad tartiib-tar-tiib u bixiso. Meel ku qoro qofka aad la hadasho iyo wixii lagu yiraa sameey. Sidoo kale, kala hadal waaxda cayrta ee degmadu inay kuu fidin karaan Gargaar Degdeg ah iyo in kale.
- Hadii aan lacag lagugu lahayn, kala hadal Hay'ada Guryaha sababta lacag sheegadka. Meel ku qoro qofka aad la hadasho iyo wixii lagu yiraa sameey. Hadii aad is af-garan waydaan wac maamulaha si aad ula Kulanto. Warqad qor si aad u haysato cadeyn ah in aad codsatay kulan.
- Waxaad xaq u leedahay inaad Kulan Yar la yeelato maamulaha. Hadii kulankaasi uu xalin waayo dhibka, waxaad codsan kartaa Dacwo Weyn in arrinta loo gudbiyo.
- Hadii sababta aad kirada u bixin wayday ay tahay wax la xiriira guriga wax ka halaysan, Codso Kulanka yar ama Dacwo Weyn si looga wada hadlo waxa u baahan hagaajinta.
- Hadii aad ku heshiisaan in aad Hay'ada Guryaha lacagta siiso heshiiscaa waa in la qoraa.

Ogow: Cadadka lacagta ah ee aad u bixinayso bil walba heshiiska lacag dib u bixinta ah waxaa maamula xeerarka u degsan hay'ada guryaha ee la yiraa (HUD). Kiradaada iyo cadadka mag-dhowga ah waa in aysan ka badnaan boqolkiiiba 40% dakhliga bil walba ku soo gala adiga. Hadii ay timaado wax dhib ahi la soo xiriir xafiiska Gargaarka Sharciyada.



Hadii aadan bixin kirada la heshi hay'ada, ama ku codso dacwo 14 cisho gudahood, Hay'ada Guryahu waxa ay xareynsan kartaa dacwo guriga lagaaga saarayo. Waxaa laguu keeni warqad maxkamadi soo diray oo kuu sheegaysa kolka ay tahay inaad maxkamada tagto. **U toog hay warqadahaas.**

Sida uu qabo sharciga Gobolka (Minnesota State) waxaad xaq u leedahay inaad kirada iyo kharashka maxkamada ku baxay aad u dhiibto maxkamada, si aan gurigaaga lagaaga saaran.

Kirada ugu yar ee la bixiyo

Qaar badan oo ka mid ah guryaha dowladu waxa ay leeyihii "kiro ugu yar" kirada la bixiyo ee ay kireystaashu bixiyaan xataa hadii dakhligoodu uu aad iyo aad u hooseeyo. Hadii aadan bixin karin

kiradaa kirada ugu yar, waxaa dhici karta inaad hesho ka saamixiid ku meelo gaar ah ama joogta ah “uga saamixida nolol adag awgeed.” Ka codso maamuluuhu inuu kaa saamaxo kiradaa markiiba. Meel ku qoro qofka aad la hadasho iyo wixii lagu yiraa sameey.

Waa inaad heshaa ka saamixida hadii sababta aadan kirada u bixin karini ay tahay sababta ah:

- Hadii shaqadii ay kaa dhamaatay
- Hadii aad ka sugayso manfac dowlada, ama manfacii dolwada lagaa jaray (laakiin sababta lagaaga jaray aysan ahayn sharciga oo aad jabisay)
- Hadii qoyskaaga dhawaan geeriysi gashay ama
- Guriga waa lagaa saari hadii Hay'ada Guryahu ay ku adkaysato inaad kirada bixiso, ama ay ku haystaan dhibaatooyin kale oo dhaqaale.

Ka saamixida ku salaysan nolosha adagi waxa ay bilaabmi bil ka dib kolka aad codsato. Hadii sababta ka saamixidu ay tahay ku meel gaar (ay socoto 90 cisho maa ka yar) Hay'ada Guryahu waxa ay dib u dhigi kartaa hawsha guriga ka saarida laakiin waxa ay kugu soo dalaci kartaa kirada la bixiyo kirada ugu yar waxa ayna ku waydiisan kartaa inaad bixiso mar uun mustaqbalka. Wuxaan ka codsan kartaa in aad hesho qorshe aad tartiib-tartiib ugu bixiso kirada si aad isaga dhameeyso aakhirka.



Hadii daruufaha aadan u bixin karin kiradu ay yihiin kuwa joogto ah (oo soconaya mudo 90 cisho), waa in lagaa masaabaxo inaad bixiso ilaa iyo inta xaaladaada dhaqaale ay iska bedelayso. Hadii Hay'ada Guryahu aysan sameyn doonin arrimahaa, ama hadii jaa la bilaabay hawshii guriga lagaaga saari lahaa, wac xafiiskaaga gargaarada sharciyada si laguu caawiyo.

Dakhliga Shaqada iyo Kirada

Kolka aad ku nooshahay guryaha dowlada, kiradaada waxaa loo qoondeeyaa inay noqoto boqolkiiba 30% dakhliga la xisaabiyo ee ku soo gala. Waxaa dhici karta in sharcigana ka kuwan yahay kuwa guryaha dowlada ee kale ee ay maamusho hay'ada la yiraa (Minneapolis Public Housing Authority). Waxaa jira waxyaabo muhiim ah oo laga reebay sharcigan. *Marmarka qaarkood*, is bedelada ku yimaada dakhliga qoysku sida shaqo cusub oo kale *markiiba ma saameeyaan lacagta kirada ah*. Xaaladaha caynkaa ah waxaa la yiraa **dakhliyada la khasbaday ee aan la ogolayn in la xisaabiyo (earned income disallowances)**. Qaar kuwaas ah waxaa ka mid ah:

- Lacag aad ka kasbatay shaqo aad heshay lix bilood gudahood intii aad qaadanaysay noocyada cayrta ka mid ah ee la yiraa MFIP ama DWP.

- Hadii aadan shaqeyn ama shaqo naf leh aadan helin muddo sannad ah ka hor inta aadan shaqo helin. Shaqada aan nafta lahayn waxaa laga wadaa shaqada ay kaa soo gasho sannadkii oo dhan lacag ah \$3,075.
- Hadii aad ku jirto barnaamij shaqo u tababarid ah.

U sheeg Hay'ada Guryaha ama xaakimka hadii xaaladaha caynkaa ahi ay adiga ku quseeyaan. Dakhliga aan la ogolayn in la xisaabiyyaa waa boqolkiiba 100% dakhliga kaa soo galay shaqada 24 bilood ka dib kolka lagu qoray shaqada. Hadii ay jiraan wax dhibaato ahi la xiriir xafiiskaaga gargaarada sharciyada si laguu caawiyo.

Cayrta iyo Kirada

Hay'ada Guryahu waa khasab inay yareyso kiradadaada hadii lagaaga joojiyo dakhligii kaa soo gali jiray cayrta sababta ah inaad isticmaashay 60 kii bilood ee laguu ogolaa inaad qaadato MFIP. Laakiin, kaama ay yareynayaan kirada hadii manfaca cayrta lagaaga jooijyey sabab ah musuqmaasuuq ama jabin sharciyada cayrta (ganaax). Marmarka qaarkood Hay'ada Guryahu waa ay khaldantaa kolka ay go'aansanayso sababta ganaaxa. Dhamaan ganaaxyadu isku mid ma wada aha. Wac xafiiskaaga gargaarada sharciyada si laguu caawiyo.

Isku Day inaad Iska Ilaliso in Guriga lagaa saaro

Mar walba waa wax wanaagsan in guri ka saar la iska ilaaliyo. Guri ka saari waa wax diiwaan gala oo cid walbaa aragto. Waxa ay ka dhigi wax adag inaad guri cusub hesho. Kolkaa hadii aad is leedahay maxkamada waa lagaaga adkaan isku day inaad guriga ka baxdo ka hor inta Hay'ada Guryahu aysa maxkamad tagin. U sheeg Hay'ada hadii aad guurayso si kolkaa aysan maxkamad uga xareyn dacwo ah inaad guriga uga baxdo ka hor ama ka dib kolka aad baxdo. Eeg warqada war-gelinta ee [Evictions](#) and [Expunging Evictions](#).



Warqadaha xogtu waa xog shari ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganaci sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo istimaalo arimo ganaci waa mamnuuc.